

Xeer-qoraalka Bukaanka ee Isbitaalka Dawladda Galbeedka Australia

Dhammaan bukaanada isticmaala isbitaalada dawladda Galbeedka Australia waxay xaq u leeyihiin:

1. inay xushtaan in isbitaalada dawladda ka helaan adeeg caafimaad bilaash ah, ama in isbitaalada dawladda ka helaan adeeg caafimaad sida bukaano khaas ah.
2. in daaweynta ku salaysnaado baahida caafimaad, iyo, haddii aad u baahan tahay inaad sugto daaweyntaan, lagu sheego waqtiga aad sugi doonto
3. inay helaan adeegyo baaxad leh ee isbitaalada dawlada ayadoo loo eegin goobta ay ka degen yihiin Galbeedka Australia
4. inay helaan turjubaan
5. inay aqbalaan ama diidaan inay ka qaybqaataan tababarka kaaliyaha ama ardayda caafimaad ama cilmi-baar daawo
6. in sirtaada iyo baahidaada shakhsiyadeed loola dhaqmo si sharaf, xushmo iyo ahmiyad leh
7. in xubin qoys, xannaaneeye, saaxiib ama qof aad xulatey ku soo raaco markii ay habboon tahay
8. inaad hesho xannaano caafimaad oo nabad iyo tayo sare leh iyo lagu baxshey xannaano xirfadeysan, aqoon iyo karti
9. in si cad laguugu sharraxo daaweyn walba oo la soo jeediyo, ay ku jiraan halisyada iyo waxyaabaha kale ee la isticmaali karo, ka hor intii aadan ogolaanin ama la diidin inaad qaadato daaweynta
10. inaad raadsato ra'yi labaad
11. in lagu siiyo macluumaad ku saabsan xannaanadaada caafimaad ee sii socda ka hor intii aadan ka tegin isbitaalka iyo in faahfaahintaada xiriirka si casri ah lagu haayo
12. inaad dalbato inaad aragto diiwaankaaga caafimaad sida u qabo *Xeerka Xorriyada Macluumaadka ee (Fol) 1992* iyo in macluumaadkaaga shakhsiyadeed lagu haayo si sir ah
13. Inaad bogaadin, faallo iyo cabasho ka bixiso xannaanada caafimaad iyo in lagu siiyo macluumaad ku saabsan sida cabasho loo sameeyo, taaso saamayn ku yeelanin xannaanadaada caafimaad.

Bukaanada caafimaadka maskaxda

Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1996 wuxuu bukaanada helo daaweynta cilmi-nafsiga siiyaa dhowr xuquuqyo dheeraad ah. Macluumaad dheeraad ah fadlan kala xiriir xafiiska Madaxa Takhaatiirta Cilmi-nafsiga (08) 9222 4462 ama u booqo www.chiefpsychiatrist.health.wa.gov.au

